EHCPs Summary (Somali)

Information Summary Sheet

Waa maxay Waxbarashada,Qorshaha Daryeelkaiyo Caafimaadka?

Iskuulada ku yalla Ingiriiska waa inay siiyaan taageero carruurta qabta baahiyaha gaarka ah ee waxbarashada (SEN) taas oo qeyb ka ah heerkooda ay kuu siinayaan carruurta. Tani waxaa la dhahaa taageerada SEN.

Halkaas oo cunuga u baahan yahay taageero dheeraad ah oo ka baxsan waxa ay tahay iskuulka, kuliyadda, ama xannaanada carruurta caadiga ahaan waxay bixin karaan miisaaniyadooda ama shaqaalayntooda marka waxay u baahan karaan Caafimaadka Waxbarashada iyo Qorshaha Daryeelka (EHCP).

Qorshaha EHC waa dukumentii u hogaansamid-sharci oo sharaxya cunuga ama baahiyaha waxbarashada gaar ah, caafimaad, iyo daryeelka bulsho ee qofka dhalinyarada ah. Dukumentiga wuxuu leeyahay liiska baahida waxbarashada gaarka ah oo dhan, bixinta si loo daboolo baahi walba iyo bixinta gaarka ah, faafaahinta iyo aqoonta. Qorshaha wuxuu magacaban yahay goobta/iskuulka taas oo loogu bixinayo qodobka isla markaana qorshuhu yahay mid sharci ahaan lagu dhaqmayo.

Nidaamka codsiga EHCP

Wajiga koowaad: Codisga Qiimeynta EHCP

Codsi qoraal ah ayaa loo sameeyn karaa maamulka deeganka ama goobta waxbarashada, waalidiinta ama qofka dhalinyarada ah. Maamulka Dowladda kadib wuxuu heystaa lix toddobaad laga bilaabo taariikhda codsiga si go'aan looga gaaro haddii la qiimeynayo cunuga ama in kale.

Haddii maamu lka deegaanka u diido inuu sameeyo qiimeynta, waxaad u soo gudbin kartaa racfaan ka qaadashada “diidmada qiimeynta” Guddiga Baahiyda Waxbarashada Gaarka ah iyo Garsoorka Naafanimada. Dhageysiga wajigaan ayaa caadi ahaan ku saleysanaya-warqad.

Wajiga labaad: Qiimeynta maamulka deegaanka wuxuu go'aaminaya bixinta EHCP

Maamulka dowladda deegaanka wuxuu heysta lix toddobaad oo ku soo ururinayo macluumaad ku saabsan baahida cunugaaga.

- Adiga iyo cunugaaga
- Xannaanada carruurta, iskuulka ama kuliyadda cunugaagu dhigto.
- Dhakhtarka dhimirka ee waxbarashada.
- Macalimiinta gaarka ah, hadii cunugaaga u qabo dhibaato maqal iyo arag.
- Caafimaadka iyo adeegyada daryeelka bulshada.
- Kuwa kale ayaa loo arkaa inay muhiim yihiin.
- Cunuga ku jira Sanadka 9 (da'da 14) ama ka weyn, talada ku saabsan u diyaargarowga qaangaarnimada iyo ku noolshada madaxbaanida.

Maamulka deegaanka ma doonayo inuu macluumaad dheeraad ah ka raadiyo xirfadlayaasha haddii tani dhawaan la bixiyay waxaad u diri karnaa warbixinada kale haddii aad heysato, tusaale ahaan warbixinta xirfadlaha madaxabanaan. Waxaad sidoo kale weydin kartaa maamulka deegaanka inaad rabto macluumaad ku saabsan cunugaaga qof aan horay ula xiriirin.

Maamulka deegaanka ayaa soo ururin doonaa macluumaad ku saabsan baahiyaha daryeelka bulshada ee cunugaaga si ay qeyb uga noqoto baahiyaha qiimeynta EHC. Haddii qoysaasku durbaba uusan u helin taageerada adeegyada carruurta, waxaad weydin kartaa maamulka deegaanka si u sameeyo qiimeyn gooni ah si loo go'aamiyo haddii adiga ama cunugaaga u baahan yahay taageerada guriga ama bulshada dhexdeeda.

Qiimeynta kadib, Maamulka Deegaanka waa inuu go'aamiya haddii u saarayo EHCP iyo in kale.

Waxaa ku jirto labo ikhtiyaar halkaan:

1. Maa mulka deegaanka wuxuu ogolyahay inuu soo saaro EHCP waxayna heystaan ilaa 12 toddobaad laga bilaabo taariikhda heshiiska qiimeynta EHC si loo saaro Qabyada EHCP iyo 2 toddobaad oo dheeraad ah si u bixiyo qorshaha ka dambeystaha ah oo ka dhigaysa 20 toddobaad wadar ahaan.
2. Maamulka deegaanka wuxuu diidaya inuu bixiyo EHCP waa inay kugu ogeysiiyaan go'aankan 10 toddobaad gudahood taariikhda la sameeyay go'aanka EHC.

Haddii maamulka deegaanka u diido inuu bixiyo EHCP waxaad ka gudbin kartaa racfaan ka qaadashada“diidmada bixinta”. Racfaankan wuxuu noqon doonaa dhageysi shaqsi ahaan halkaas oo looga rabo inaad soo xaairito (surtagalnimada mareegta kumbuyuterka).

Wajiga Sadexaad: Waxbarashada, Caafimaadka iyo Qorshaha Daryeelka

Waalidiinta ayaa heli doonaa qabyada EHCP, waxaad heystaa 15 maalmood si aad u codsato wixii isbeddelo ah. Qabyada EHCP ma magac dhabi doonto iskuulka marka waa inaad siisa ikhtitaarkaaga maamulka deegaanka. Mar haddii isbeddello suurtagal ah la sameeyo ama faallooyinka la xaliyo, EHCP waa la dhammaystiray.

Imisa ayuu soconaya EHCP?

EHCP waxay dhammaan kartaa oo kaliya marka midkooda ama labada soo socota la isticmaalo;

• Laga marmaan ma ahan.

• Maamulka deeganka masuul ka mahan mar dambe cunugaaga ama qofka dhalinyarada ah. EHCP bixinteeda waxay dhammaan kartaaa ilaa cunugaada uu ka tagayo waxbarashada ama ilaa 25. Ma daboosho jaamacadaha.

Dib u eegida Sanadlaha

Dib u eegida EHCP waxay dhaceysaa hal jeer sanadkii ugu yaraan waxayna ku saleysan tahay dib u eegistaan, maamulka deegaanka ayaa qaadi karaa mid ka mid ah sadex tallaabo:

• Inuu waxbo ka beddelin EHCP oo u sii wado sidii hore
• Dhammayo EHCP
• Beddelid ku samee qorshaha

Dib-u-eegiddu waxay ku lug leedahay dhammaan saddexda qeybood: waalidiinta, dugsiga/kuliyadda iyo maamulka degeenka. Dib eegisyada caadi ahaan waxaa loogu sameeynaya dugsiga ama kuliyadda sanadle ahaan wuxuna siinaya waalidiinta fursad ay u sheegaan walac walba. Waxay sidoo kale u ektahay in taageerada ku haboon tahay baahiyada ardayga in kale sanadka soo soocda, haddii dib u saxiyada ay keeni karto hormar wanaagsan.